

Biyaha la Cabbo Mpls - Warqadda Xaqiiqada Macdanta "lead"



Su'aalaha Badanaa Leyska Weydiyo (FAQ) Macdanta "Lead"

Sidee ayay macdanta "lead" ku gashaa biyaha tubada?

Sida ugu badan ay macdanta "lead" ku soo gasho biyaha tubada waa tubooyinka macdanta "lead" ee loo isticmaali jiray biyaha intii ka horeysay 1930. Waa la baaraa biyaha ka soo baxa meelaha lagu nadiifiyo biyaha Magaalada si loo hubsado in ay ka madax banaan yahiin macdanta "lead".

Maxuu yahay Sharciga Macdanta "Lead" iyo Macdanta "Copper"?

Bishii Juunyo 7, 1991, Wakaaladda Badbaadinta Deegaanka Mareykanka (U.S. Environmental Protection Agency) waxay soo saartay sharci lagu kantaroolo macdanta "lead" iyo macdanta "copper" oo ku saabsan cabbidda biyaha. Sharcigaan, loo yaqaan Sharciga Macdanta "lead" iyo Macdanta "Copper" wuxuu ka rabaa danabka biyaha in ay la socdaan biyaha laga cabbo tubooyinka macaamilka. Haddii boqolkii 90 macdanta "lead" ka badato heerka 15 qeyb halkii balyan ama boqolkii 90 macdanta "copper" ka badato heerka 1.3 qeyb halkii malyan, siistemka waa in uu qaado dhowr talaabo dheeraad ah si loo kantaroolo mirirka. Haddii heerka macdanta "lead" la dhaafu, shirkadda biyaha waa in ay sidoo kale ogeysiiso dadweynaha talaabadaha ay qaadi doonto si ay u badbaadiyaan caafimaadkooda iyo in shirkadda biyaha baddasho khadadka adeegga macdanta "lead" ee iyaga hoos yimaada.

Magaalada marna ma la kullantay jebinta Sharciga Macdanta "Lead" iyo Macdanta "Copper"?

Maya, qeybta Nadiifinta iyo Qeybinta Biyaha Magaalada marna lama kulmin jebinta Sharciga Macdanta "lead" iyo Macdanta "Copper".

Maxay tahay biyo gelinta, iyo maxaa qaar looga sameyay macdanta "lead"?

Gelinta adeegga waa tubada biyaha ee isku xerta tubada weyn ee marta jidka iyo tubada ku jirta gurigaada. Magaalada Minneapolis, khadadka adeegga ee gala hantida la daggan yahay lana geliyay intii ka horeysay 1930 waxaa badanaa laga sameyay tubooyinka macdanta "lead". Caadi ahaan, qeybta macdanta "lead" ee ku jirta isku xerka adeegga waxaa lagaa bilaabaa tubada weyn ilaa sanduuqa joojinta, halkaas ay qeybta isku xerta sanduuqa joojinta ilaa mitirka biyaha ay ka samaysan tahay birta korka laga mariyo macdanta "zinc". Bulshadaha kale, biyo gelinta qeybta macdanta "lead" waxaa ka mid noqon kara tubooyinka biyaha ka soo qaada tubada biyaha jidka ilaaa mitirka biyaha. Sanduuqa joogsiga wuxuu badanaa ku yaal hantida la daggan yahay, waxaana loo isticmaalaa in la furo ama la xero biyaha iyadoo aan la gelin hantida.

Minneapolis, khadadka adeegga waxaa mas'uul ka ah milkiilaha hantida. Lama samayn karo khadadka adeegga ee ka sameysan macdanta "lead"; waa la baddali karaa oo keliya. Milkiileyaasha guryaha ee raba in ay wax ka ogadaan haddii khadka adeegooda leeyaha macdanta "lead" waxay wici karaan xafiiska Isku Xeridda Danabka Hawlaha Guud ee Minneapolis (Minneapolis Public Works Utility Connections), telefoonka 612-673-2451.



Biyaha la Cabbo Mpls - Su'aalaha Badanaa Leyska Weydiyo

(FAQ) Macdanta "Lead"

Magaalada ma kormeertaa macdanta "lead" ee ku jirta tubada biyaha gudaha guriga?

Haa. Milanka macdanta "lead" waxaa saddax sanno kasta laga fiiriya goobaha la daggan yahay ee loo yaqaan balliga kambiyoonaha "Safka 1aad". Guryaha Safka 1aad waa in ay ahadaan dhismooyinka loogu talogalay hal qoys :

- khadadka adeegga macdanta "lead",
- tubooyinka macdanta "lead" ama
- tubooyinka macdanta "copper" ee lagu alxamay macdanta "lead" lana geliyay 1982 kaddib, balse ka hor inta aan la joojinin alxanka ku badan macdanta "lead" (1985).

Sannadkii 2015, waxaan kormeerka macdanta "lead" ka fullinay 54 Goobaha Safka 1aad. Dhamaan natijadaha kambiyoonaha waxay ka hooseyeen heerka macdanta "lead" ee 15 qeyb halkii balyan. Natijada boqolkiiba 90^{ka} waxay ahayd 2 qeyb halkii balyan (natijada ugu badan waxay ahayd 11 qeyb halkii balyan). Ma jiraan kambiyoonaha macdanta "lead" oo la celiyay ama lagu arkay cillad.

Dhamaan kambiyoneyaasha la soo aruuriyo waxaa baara shaybaar shahaadad ku haysta oo madax banaan iyo heshiis la galay Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Bacdamaa heerarkena macdanta "lead" hooseyaan, waxaan xaq u yeelanay kormeer la dhimay sannadkii 2002. Waa la yareyay kormeerka, laga bilaabo 100 kambiyone ilaa 50. Waa la hubiyaa dhamaan goobaha si loo hubsado in ay la kulmaan sharuudaha Safka 1aad.

Magaalada ma baddashay ilaha ay ka hesho biyaha tubada?

Maya, Minneapolis waxay weligeed ka heshaa biyaha Wubiga Mississippi.

Maxay sameysaa Magaalada si ay uga hortagto mirirka tubada?

Magaalada waxay biyaha ku dartaa "ortho polyphosphate" taasoo ah kiimiko oo si gaar ah biyaha uga ilaaliso khadka mirirka. Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health) waxay u baahan tahay in siistemkena qeybinta sii wado milanka "ortho phosphate" ee 0.4 qeyb halkii malyan. Wuxaan kambiyoonaha laga soo qaaday 10 goob oo ka tirsan siistemkena u gudbinnaa Waaxda Caafimaadka Minnesota si loogu sameeyo baaritaanka "ortho phosphate". Isku celceliska natijada 2015 waxay ahayd 0.52 qeyb halkii balyan; baaxadda waxay ahayd 0.46 - 0.60 qeyb halkii malyan.

Sidoo kale, Magaalada waxay yareysaa aashitada biyaha laga soo darsado Wubiga Mississippi. In pH yahay 8.8 - 9.0 waxay hubisaa in biyaha aysan lahayn mirir.

Haddii biyaha lumiyo midabka, taasi ma waxaa in biyaha laga helo macdanta "lead".

Maya. Mirirka midabka doorsooma waxaa ugu sabab ah macdanta "lead" ee ku milma biyaha gudaha tubooinka. Tani waxay badanaa dhacdaa marka xawaaraha biyaha ku jira tubada isbaddalo, sida marka tubada dab damiska la furo. Macdanta ku milan waxay inta badan ka kooban yahiin bir, ee ma aha macdaanta "lead" mana laha halista caafimaadka.



Biyaha la Cabbo Mpls - Warqadda Xaqiiqada Macdanta "lead"

Xaggee ayaan ka heli karaa macluumaad badan oo ku saabsan macdanta "lead" ee ku jirta biyaha la cabbo?

- www.health.state.mn.us/divs/eh/water/factsheet/com/letitrunk_english.html
- www.drinktap.org/water-info/whats-in-my-water/lead-in-water.aspx
- www.epa.gov/lead/index.html

Sidee loo yareyn karaa macdanta "lead" ee ku jirta tubada biyaha?

Dhaaf In Biyaha Socdaan. Haddii aad ka walwalsan tahay in macdanta "lead" ku jirto biyaha la cabbo, waxaad furi kartaa biyaha tubada ka hor inta aadan biyaha u isticmaalin cabbitaan ama karis. Biyaha fadhiya gudaha tubooyinka muddo dheer, sida biyaha ku barya habeenkii ama maalinimadii marka dadka tagaan shaqada iyo dugsiga, waxay u badan tahay in ay waxyabo ka dhuuqaan siistemka biyaha. Sida ugu fiican oo tubooyinka looga saaro biyaha laga yaabo in ay leeyahiin macdanta "lead" waa in tubada biyaha qabow socdaan ilaa aad ka dareentid in biyaha qobow yahii ilaa inta ay noqon karaan qabow. Qiyaasta shayga ay tani qaadato waxay ku xeran tahay gurigaada iyo sida tubooyinkaada isugu toosan yahii - hase ahatee waa in aad mar kasta socodsiisid biyaha ugu yaraan 60 sekan.

Haddii gurigaada leeyahay khadka adeegga macdanta "lead" (taasoo aad ogaan kartid adiga oo weydiya danabka biyaha deegaanka), waa in aad raacisid biyaha 2 ilaa 3 daqiqo dheeraad ah si aad u hubsatid in aad biyo saafi ah ka heshid tubada weyn. Hubso in aad raacisid biyaha fadhiya ka hor inta aadan biyaha u isticmaalin cabbitaan ama karis.

Talooyinka biyo raacinta:

- Waxyabaha kale ee loo isticmaalo biyaha reerka ayaa sidoo kale kaalmo ka geysta socodsiinta biyaha fadhiya tubooyinka gurigaada. Tusaale ahaan, waxaa dhici karto in aad rabtid in aad sameysid joogtada hawlaho guriga ee isticmaala biyaha - sida qabeyska tubada, raacinta musquusha, ama dhaqaha saxuunta - shayga ugu horeeyo subaxnimada ka hor inta aadan biyaha u isticmaalin cabbid ama karis. Xasuuso in aad weli u baahan doontid in aad raacisid tubooyinka ilaa muddo gaaban ka hor inta aadan u isticmaalin in aad ka cabtid biyaha.
- Biyaha aad ka shubatid tubada biyaha la cabbo ma aha in la khasaariyo. Wuxaad biyahaan u isticmaali kartaa nadiifinta ama in aad ku waraabisisid dhirta.
- Wuxaad weel biyo la cabbo ku haysan kartaa qaboojiyahaada, si aadan biyo u shubin mar kasta aad u baahan tahay biyaha.

Waxaad Biyaha Qabow u Isticmaashaa Kariska iyo Cabbidda Keliya. Biyaha kulul waxay dhakhso u milmiyan macdanta "lead" marka loo fiiryo biyaha qabow, marka ha isticmaalin biyaha ka yimaada tubada biyaha kulul si aad wax ugu karsatid ama cabtid. Haddii aad u baahan tahay biyo kulul aad wax ku karsatid ama cabtid, shubo biyaha tubada kaddibna kululeey. Waxaa si gaar muhiim u ah in aan biyaha kulul loo isticmaalin caano booraha formula ee la siyo dhallaanka.



Biyaha la Cabbo Mpls - Warqadda Xaqiqa Macdanta "lead"

Aqoonsiga iyo Gadaashada Tubooyinka Ka Madax Banaan Macdanta "Lead"

Tubooyinka ma leeyahiin macdanta "lead"?

Inta badan tubooyinka la iibsaday 1997 ka hor waxaa laga sameyay macdanta "brass" ama macdanta "chrome-plated brass" taasoo laga helo ilaa boqolkiiba 8 macdanta "lead". Biyaha fadhiya habeenkii (ama muddo dhown saac) gudaha tubada macdanta "lead" waxay u badan tahay in ay macdanta "lead" soo raacd biyaha tubada macdanta "brass", taasoo soo saarta heerar sare oo ah macdanta "lead", biyaha ugu horeeyo ee la cabbo. Macdanta "lead" waa arrin culus oo la xariirta caafimaadka, khaas ahaan xagga caruurta iyo dumarka xaamilada ah, bacdamaa ay ku badan karto gudaha jirka kaddibna sabab u noqon karto burburka ku dhaca maskaxda, unugyada dhiigga cas, iyo kilyaha.

Sidee ayaan ku ogaan karaa haddii tubada cusub ka madax banaan tahay macdanta "lead"?

Warshadaha sameeyo tubooyinka, iyaga oo ka jawaabo sharciyada dhawaan la soo saaray, waxay yareyeen ama ka saareen macdanta "lead" ee ku jirta guryaha sida tubooyinka jikada, tubooyinka musqusha, tubooyinka makhaayadaha, tubooyinka dibadda ee laga cabbo biyaha, iyo qalabka lagu sameeyo barafka. Heerka qaranka oo lagu xaqijiyo xaaladda "ka madax banaanida macdanta lead" qalabka biyaha waa Heerka Caalamka 61-Qeybta 9 Mu'asasada Nadaafadda Qaranka [National Sanitation Foundation (NSF) International Standard 61-Sectopm9]. NSF waxay bixisaa buugaagta kataalogga iyo bogga internetka kombuyutarka soo taxa liiska qalabka tubooyinka ka "madax banaan macdanta lead". NSF waxaa lagala xariiri karaa telefoonka 1-800-NSF-MARK ama www.nsf.org. Tubooyinka cusub ee la kulma heerka NSF 61 waxay yeelan doonaan shabadda NSF 61/9 oo lagu dhufuto sanduuqa boorka tubada cusub.

Xasuuso in ereyga ka "madax banaan macdanta lead" tahay habaabin bacdamaa sifeynteeda sarciga u ogoshahay tubada in ay leedahay ilaa 11 qeyb halkii balyan (ppb) oo ah macdanta "lead" iyadoo isticmaasha nidaamka tijaabinta u dagsan. Heerka qaranka macdanta "lead" ee ku jirta biyaha waa 15ppb. California waxay leedahay heer adag oo ku saabsan tubooyinka macdanta "lead" kaasoo ah Sharciga 65 (Proposition 65) wuxuuna yeelan karaa ilaa 5 ppb oo ah macdanta "lead" iyo tubooyinka musqusha oo yeelan kara ilaa 11 ppb. Tubo kasta oo laga iibyo California, oo aan la kulmin heerka California, waa in la soo dhex geliyo digniinta Sharciga 65 ama in lagu dhajyo digniin.

Haddii tubadaada cusub leedahay shabadda NSF 61/9 sanduuqa baakada iyo aysan lahayn digniinta Sharciga 65, markaas tubada waa tubo ka "madax banaan macdanta lead" iyo tubo ay ku yar tahay macdanta "lead". Tani waa tubada loogu jecel yahay.

Ma jiraan tubooyin aan marna lahayn macdanta "lead"?

Qaar ka mid ah soo saareyaasha tubooyinka waxay soo saaraan tubooyinka blaastiigga halkaas ay eber tahay macdanta "lead" ee ku jirto. Soo saareyaasha qaar waxay macdanta "lead" ee ku jirta macdanta "brass" ku baddalaan biro kale, iyaga oo tubooyinka macdanta "copper" geliya gudaha macdanta "brass", ama si gaar ah korka ka mariya gudaha tubooyinka si loo yareeyo ama looga saaro macdanta "lead".



Biyaha la Cabbo Mpls - Warqadda Xaqiiqada Macda

Minneapolis
Public Works

Muhiimad miyay leedaahay haddii aan qabo tubo ay aad u hooseyo macdanta "lead" ee ku jirto?

Marka lagu jiro xaaladaha ugu darran, tubooyinka duugga waxay ku biirin karaan hal meel marka la soo qaado saddax meel macdanta "lead" subaxnimada, marka kowaad biyaha laga shubo tubooyinka kale sida meelaha ay iska galaan alxanka tubooyinka macdanta "copper" intii ka horeysay 1988. Dadka daggan ee biyaha ka sii daaya tubada subaxnimada muddo hal daqiqo iyo isticmaala biyaha qabow in ay wax ku karsadaan waa in ay wax yar ka walwalaan macdanta "lead" ee ku jirta biyaha la cabbo. Haddii dadka daggan ay weli ka walwalsan yahiin, waxay ka codsan karaan shirkadda biyaha siisa in ay samayso baarintaanka macdanta "lead" (kharash caadi ah oo laga dhaafi karo sida hoos timaada xaaladaha gaarka) ama liiska shaybaarada xaafadda ee loo ogolaaday in ay sameyaan baaritaanka macdanta "lead". Dadka daggan waxay mar kasta haystaan fursad ay jikada duugga ama tubada qabeyska ku baddalaan tubada ay aad ugu yar tahay macdanta "lead".

Ma jirtaa in qaar ka mid ah qalabka biyaha weli leeyahiin macdanta "lead"

Sharciyada Federaalka iyo Gobolka ee ku saabsan macdanta "lead" kama hadlaan tubooyinka, qalabka saxanka lagu qabeysto, madaxa tubada qabeyska, iyo tubooyinka warshadaha. Iska ilaali in aad cabtid ama in aad ku karsatid biyaha qalabkaan. Laga bilaabo sannadkii 2000, dhamaan tubooyinka jikada ee laga iibiyay California waxaa aad ugu yaraa macdanta "lead". Laga bilaabo 2010, marka la baddalay qalabka biyaha ee loogu talogalay qaadidda biyaha la cabbo ee California, waa in lagu baddalo alaab ay ku yar tahay macdanta "lead" (kana badneyn boqolkiiiba 0.25 macdanta "lead").

Wakaaladda Badbaadinta Deegaanka Mareykanka (U.S. Environmental Protection Agency) waxay ku shaqeysaa Xarunta Macluumaadka Qaranka Macdanta "Lead" (National Lead Information Center), telefoonka 800-424-LEAD (5323) ama waxaa lagala xariiri karaa boggeeda internetka www.epa.gov/lead.

